

Su'aalo?

Adeegso khayraadka hoos ku qoran ama wac Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH).

Khayraadka

Buug-yaraha Mulkiilaha Ceelka: Waa hagaha macmiilka ee ceelasha biyaha Minnesota asagoo qaab (PDF) ah

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/construction/handbook.pdf)

Ka tabaabushaysiga daadadka ee Ceelasha Biyaha ee Gaarka loo Leeyahay

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/natural/floodprecautions.html)

Hagaha Qandaraaslaha Ceelasha ee shatiga haysta

(www.health.state.mn.us/lwcsearch)

Oodista Ceelasha iyo Godadka

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/sealing)

Raadi Shaybaariste Shahaada Haysta

(www.health.state.mn.us/labsearch)

Tayada Biyaha iyo Baarista

(www.health.state.mn.us/wellwater)

Xafiisyada MDH

625 Robert Street North

P.O. Box 64975

St. Paul, MN 55164-0975

651-201-4600 or 800-383-9808

health.privatewells@state.mn.us

www.health.state.mn.us/wells

Goobaha ay ku yaalaan Xafiisyada Degmada

Bemidji


Duluth

Fergus Falls

Marshall

Rochester

Saint Cloud



Si aad u hesho cinwaanka saxda ah iyo halka lagala soo xiriiri, fadlan booqo:

<https://www.health.state.mn.us/about/locations/index.html>

To obtain this information in a different format call 651-201-4600. Printed on recycled paper.

ID# 53504 Communication_Information\Publications\WellOwnersGuide 12/23/2024R

Hagaha Mulkiilaha Ceelka




m DEPARTMENT OF HEALTH

Ceel si fiican loo dhisay, loo daryeelay, loona tijaabiyay waxaa laga helayaa biyo la cabbo oo nadiif ah loona adeegsan karo hawlaha guriga, beeraha iyo ganacsigaba.

Ceel badqab leh wuxuu kor u qaadaa caafimaadka qoyskaaga, wuxuu sidoo kalana ilaaliyaa biyaha Minnesota ee dhulka hoostiisa ku jira. Adiga iyo qandaraaslaha shatiga haysta waxaad door muhiim ah ku leedihiin helista ceel badqab leh. Xasuusnoow kaalintaada. →

Si fiican u xafid dhammaan waraaqaha iyo dukumintiyada la xidhiidha dhismaha ceelka, dayactirka, hagaajinta, jeermi-dilista, ka saarida wasakhda iyo tijaabinta. Xafid dhammaan waraaqaha iyo diiwaanka la xiriira dhismaha ceelka sida dayactirka, hagaajinta, jeermi-dilista, ka saarida wasakhda iyo baarista.



Test your water.

Tijaabi biyahaaga.

Inspect your well.

Kormeer ku samee ceelkaaga.

Protect your well.

Ilaali ceelkaaga.

Seal unused wells.

Dabool ceelka aan la isticmaalin.

Dad tiradoodu dhantahay 1.1 Milyan oo Minnesota ku nool ayaa biyaha ka caba

Mas'uuliyadaha Qandaraaslaha Ceelka ee shatiga leh

Kolka aad dhisanayso ceel cusub*

Xaqiiji in aad ka dhisanayso goob ku habboon.

- Masaafada saxda ah ee aad u jirsanayso ilaha wasakhda (fiiri sawirka hoose).
- Ceelka waa in uu ka fogyahay biyo-mareenada.
- Goobta ugu saraysa dhismaha ee wax laga dhiso.

U hogaansan shuruucda MDH adoo isticmaalaya hababka, badeecadaha iyo agabka la ansixiyay.

Ka hor inta aadan isticmaalin ceelkaaga si aad biyo ooga cabto ama aad wax ku kariso, ka nadiifi ceelkaaga bakteeriyada waxyeelada keenta.

Bilowgiiba ururi muunadda biyaha ka dib marka dhismuhu dhammaado si loo baadho bakteeriyada coliform, nitrate iyo arsenic.

Wuxuu ku siinayaa nuqul ka mid ah natiijooyinka baaritaanka biyaha iyo diiwaanka dhismaha ceelka, waxaana sidoo kale loo yaqaan kaydiyaha macluumaadka ceelka ee well log.



Sawirka sare: Liiska tilmaamaya qeyb ahaan inta ugu yar ee la loo jirsan karo.

si aad u ilaaliso biyahaaga, masafo u jirso ceelkaaga si wasakhda aysan u soo gaarin. Ceelasha xasaasiga ah qaarkood waxay u baahan doonaan in ceelka loo jirsato masafo dheer. Si aad u hesho liis dhamaystiran oo ah masaafada loo baahanyahay in aad ceelka u jirsato, eeg [Inta laga Fogaanayo Ceelka Biyaha Bixiya](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction/isolate.html) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/construction/isolate.html).

*Waa lagu oggolyahay in aad Minneosta ceel ka dhiso haddii aad u isticmaalayso gurigaaga, beertaada iyo haddii aad beer ganacsi ah aad samaysanayso, balse waa inaad leedahay hantida ama aad kiraysato. Waxaana lagaa doonayaa in waraaqahaagu waafaqsanyihiin shuruucda gobolka Minnesota. La xidhiidh Waaxda Caafimaadka Minnesota ka hor intaadan dhismaha bilaabin.

Masuuliyadaada

Test your water. Tijaabi biyahaaga.

Maadaama khayraadka dabiiciga ah iyo shaqooyinka dadku ku hawlan yihiin ay wasakhayn karaan ceelasha, keeni karaana waxyeelooyin caafimaad ee waqtiga dhow iyo kan fogba, waxaad masuul ka tahay in aad si joogta ah u baarto ceelkaaga biyaha. Adiga ma dhadhamin kartid, ma arki kartid, mana urin kartid haddii uu ceelka wasakhaysan yahay oo waxaad u baahantahay qof shahaado haysta oo ku takhasusay shaybaarka si uu tijaabo ooga qaado ceelka. La xidhiidh waaxda adeegga caafimaadka dadwaynaha iyo bay'adda ee degmadaada si aad u ogaato tilmaama la raaco una waydiiso haddii ay bixiyaan adeegga baarista ceelasha.

Protect your health!

Test your well water for:



Testing is even more important if young children drink the water

Inspect your well regularly. Kormeer ku samee ceelkaaga.

- **Burbur:** Wax dildilaac ah ama daloolo ah oo ku yaal daboolka ceelka, daxalaysi, fiilooyinka oo dabca ama simitaanka ciidda miyaa jira?
- **Daboolka ceelka:** Ma si ammaan ah ayuu ceelka u daboolanyahay? Ma jabanyahay daboolka mise daboolba maleh?
- **Isku xidhaha:** fiilooyinka korantada iyo isku xirayaasha kale si fiican ma loo dhuujiyay?



Ceelka ay xaaladiisu wanaagsan tahay



Ceel bur bursan

Protect your well. Ilaali ceelkaaga.

Waxyaabahan samee:

- Ceelka waa in uu ugu yaraan 1-foot dhulka ka sarreeyaa.
- Ka fogee ceelka qashinka dhismaha ka soo hara.
- Qadarka masaafada ee ugu habboon u jirso ilaha wasakhda (fiiri sawirka dhanka bidix).
- Si aad ceelkaaga uga ilaalisid waxyeelada mashiinada iyo gawaarida, ku calaamadee calamo iyo astaamo.
- Taxadar la imoow daadadka ka hor iyo dadib'ba.

HA SAMAYN waxyaabahan:

- U ogolow biyaha inay ku dul wareegaan ceelkaaga.
- Istickmaal, kaydi, ama tuur waxyaabaha wasakhaysan (sida qashinka xoolaha, bacriminta, sunta cayayaanka, ama kiimikooyinka khatarta ah) ee u dhow ceelkaaga.
- Xayawaanada ku xidh ceelkaaga.
- Ku tuur qashinka ceelasha aan la isticmaalin.

Seal unused wells. Dabool ceelka aan la isticmaalin.

Ceelka aadan isticmaalin (aanba la isticmaalin) waxa uu noqon karaa dariiq ay wasakhdu ku gasho biyaha dhulka hoostiisa waana khatar. Sharciga Minnesota wuxuu masu'uuliyadda daboolista ceelasha aan la isticmaalin saarayaa mulkiilaha hantida. Kaliya qandaraasle ceel oo shati haysta ayaa si sharci ah ceelasha u xidhi kara.

La xidhiidh qandaraasle ceel oo shati haysta haddii ceelkaagu u baahan yahay in la dayactiro ama la xidho.